

# Baaq-daraasadeed ku socda Cilmibaareyaasha

## Baraha Bulshada iyo Isbeddelka Bulshada Soomaaliyeed

**Goorta Shirka:** Ogoosto 25-26

**Goobta Shirka:** Wali lama go'aamin

**Nagala soo xiriir:** callforpapers@heritageinstitute.org

Helitaanka khadka internetka iyo horumarka waayadaan danbe laga gaaray isgaarsiinta, warfaafinta iyo tignoolajiyadda casriga ah ayaa keenay in baraha bulshadu saamayn weyn ku yeesho isdhexgalka iyo xiriirka ka dhaxeeya dadka. Fagaareyaasha baraha bulshada ayaa dadka isticmaala u ogolaaday in ay ku xirmaan daafaha dunida. Soomaali badan, gaar ahaan dhallinyarada ayaa baraha bulshada si xad-dhaaf ah ugu isticmaala madadaalada, wararka, arrimaha siyaasadda, ganacsiga, diinta, iyo isgaarsiinta. Fagaarayaasha baraha bulshada ee ay dhallinyarada Soomaaliyeed adeegsadaan waxa ka mid ah WhatsApp, Facebook, Twitter, YouTube, TikTok, iyo Instagram. Dadka isticmaalah baraha bulshada waxa ay ku wadaagaan figradaha iyo aragtiyaha, waxaanay ku ogaadaan waxyaalaha ka dhacaya dunida dacalladeeda. Waxa kale oo uu baraha bulshadu fududeeyay isku xiranka ganacsatada iyo macaamiishooda, iyo in ay macaamiisha toos ula xiriiraan ganacsatadu iyo waliba in ay ogaadaan aragtiyaha ay macaamiishu qabaan waxyaalaha ku salaysan ganacsigooda iyo adeegyadooda

Isticmaalka baraha bulshadu waxa uu muhiim u noqday dad badan oo dunida ku nool, isticmaalka fagaarayaashiisuna waxa ay aad ugu soo badanayaan dhallinyarada Soomaalida. Sidaa darteed, fahankeenna la xiriira saamaynta uu ku leeyahay bulshada waa mid kooban, sababta oo ah waxa aad u yar ama aan jirin ba daraasado aqoomaysan oo laga sameeyay mowduucan. Arrimaha ugu badan, ee halkan la isku waydaarsadaa waa warar been abuur ah, fadeexayn, cagajuglavn, dhalan-guur, xagjirnimo, kalaqaybin, balwado, dhibaatooyinka nafsi ah iyo kuwo bulsho. Waxa intaas dheer, wali si buuxda looma daraasaynin sida ay Soomaalidu u isticmaasho baraha bulshada, marka loo eego ka qaybgalka arrimaha bulshada, ka qaybgalka siyaasadda, ilaalinta dhaqanka, wacyigalintaaademenimada, nabadaynta iyo kor u qaadista heshiisiinta bulshada. Mowduucyadani waxa ay u baahan yihiin in ay fiiro gaar ah u yeeshaan cilmibaarayaasha Soomaalidu, si ay waalidiinta, dadka waaweyn, macallimiinta iyo jaangooyeyaasha siyaasaddu u yeeshaan ogaal ay ku abuuri karaan istaraatijiyado la xiriira baraha bulshada.

Iyada oo arrinta laga shidaal qaadanayo, waxa uu Machadka Daraasaadka Siyaasadda ee Heritage soo dhoweynayaa soo gudbinta daraasadaha ku salayan mowduucan, "Baraha Bulshada iyo Isbeddelka bulshada Soomaaliyeed."



Waxa kale oo uu soo dhoweynayaa soo gudbinta doodaha la xiriira arrintan iyo mowduuca shirka. Cilmibaarayaashu waxa ay xulan karaan mid ka mid ah mowduucyada hoos ku xusan ama mowduuc kasta oo quseeya shirka, waxaanay diiradda saari karaan nooc ka mid ah fagaarayaasha baraha bulshada (sida Facebook, Twitter, YouTube, Instagram, WhatsApp, TikTok, etc.) Warbixinaha ayaa noqon kara dhacdo loo kuurgalay (case study) ama fagaarayaashaas oo si gaar ah loo daraasadeeyay.

<b>Mowduucyada Shirka ee quseeya Baraha Bulshada iyo Bulshada Soomaaliyeed</b>	
Baraha Bulshada iyo U dhaqdhaqaqa Siyaasadda Baraha Bulshada iyo Horumarinta Bulshada Baraha Bulshada iyo Xiriirkha Dadweynaha Baraha Bulshada iyo Aqoonsiga Baraha Bulshada iyo Caafimaadka Maskaxda Baraha Bulshada iyo Diinta	Baraha Bulshada iyo Dhowrsanaanta Baraha Bulshada isdhexgalka Baraha Bulshada iyo Ganacsiga Baraha Bulshada iyo Waxbarashada Baraha Bulshada iyo Amniga iyo Rabshadaha Mowduucyada kale ee quseeya Baraha Bulshada

<b>Hagayaasha Duluc-daraasadeedka iyo Warbixin-daraasadeedka dhammayska tiran</b>	
<b>Dulucda daraasadda</b>	<b>Warbixin Dhammaystiran</b>
Waa in ay warbixintu la xiriirtaa mawduuca shirka	Waa in ay warbixintu la xiriirtaa mawduuca shirka
Waa in ay luuqaddu waadix tahay, oo saxan tahay	Waa in ay luuqaddu waadix tahay, oo saxan tahay
Waa in ay ku cad yihii hordhaca iyo ujeeddada daraasaddu	Waa in ay cad yihii hordhaca iyo ujeeddada daraasaddu
Waa in ay ku cad yihii Baaxadda dhibta iyo goldaloolooyinka ay cilmbaaristaadu gufaynayo	Waa in ay cad yihii Habraaca Daraasadda Milicsi-daraasadeed urursan(Short literature review)
Habraaca Daraasadda Muhiimadda/waxtarka ay daraasaddu u leedahay arrimaha siyaasadda	Natiijooyinka, falaqaynta, gunaanadka iyo talobiximaha daraasadda
Dhererka: 200 eray	Dhererka: 3,000 ilaa 4,000 oo eray
<b>Xilliga ay ku eegtahay soo gudbinta Duluc-daraasadeedku: 25 Feebaraayo 2023</b>	<b>Xilliga ay ku eegtahay soo gudbinta Warbixin daraasadda oo dhammaystiran: 30 Juun 2023</b>

**Waraaqaha oo dhan waxa lagu soo dirayaan cinwaankan: [callforpapers@heritageinstitute.org](mailto:callforpapers@heritageinstitute.org).  
Waraaqaha la aqbalo waxa lagu soo jeedin doonaa, laguna daabici doonaa Ingiriisi iyo Soomaali. Wixii intaa ka faahfaahsan nagala soo xiriir cinwaanka kor ku xusan.**